# Fariin Ka Socota Guddoomiyaha Waxbarashada: Wararkii Ugu Dambeeyey ee Tallaabooyinka Kharashka Lagu Dhimayo Dugsiyada Dadweynaha Portland

Maayo 5, 2020

Qoysaskayaga Qaaliga ee PPS,

Labo bilood ka hor, hab nololeedkeenii bulshadeena ee caadiga ahaa waxaa bedelay kana hor yimid dhibaatooyinka caafimaad ee uu keenay xanuunka COVID-19 ee aynaan hore u arag. Iyada oo ay inoo bilaabmeyso todobaadkii sideedaad ee aad guryaha joogno, waxaan mahadnaq aan la soo koobi karin u hayaa shaqaalaheena sidii ay iskugu taageen in shaqadii waxbarista, taageerida, ku xirnaanshaha iyo gaarsiinta addeegyaddii lagama maarmaanka ahaa ardaydeena maalin kasta, iyo waliba dhammaanteen kalgacal iyo samir inaga guureyn idinka iyo ardaydiina inaka oo ka guureyna nidaamkeenii dhaqanka ahaa ee waxbarashada soo jirtay 170 sanno ee la soo dhaafay iyada oo aan u guureyno noocan casriga ah ee maqal iyo muuqaalka ah la isku gaarsiiyo fasaladii.

Marka aad eegto baaxada xanuunkani saf-mareenka ah, gobolka Oregon wuxuu waajayahaa saadal dhinaca dhaqaalaha oo ay adagtahay sidii loo maareyn lahaa. Dhibtani dhaqaale waxa ay raad ku yeelaneysaa dhammaan iskuulada degmada oo dhan bilaha iyo sanadaha soo socda. Maadaama aan ahay ilaaliyaha lacagta dadweynaha, waxa aan amray kooxaheena todobaadkii hore sidii ay u habeyn lahaayeen in la joojiyo inaan shaqo qoris la sameyn iyo sidoo kale in la xakameeyo wixii la soo iibsan jirey iyo socdaalkii. Jimcihii la soo dhaafay, waxa aan shaqalaheena wadaagnay tallaabo tani xigta ee lagu yareynayo kharashaadka iyada oo aan rajeyneyno sidii uu u yaraan lahaa raadka uu ku yeelan doono jagooyinka shaqo ee sanad-dugsiyeedka soo socda ee suurtagalka ah ee dhinaca waxbarashada ardayda PPS.

**Laga bilaabo todobaadkani, Dugsiyada Dadweynaha Portland waxa ay todobaadkii shaqeyn doonaan afar maalmood.** Marka ay Golaha Waxbarashada PPS ansixiyo maalinta Tallaadada, Maayo 5teeda iyo heshiiska aan isla meel dhignay guddiyada laamaha shaqaalahayaga, sida ay u badan yahay shaqada degmadu oo ay ku jiraan waqtiga ay macalimiintu ardayda siinayaa casharada dhinaca muuqaal baahiyaha la iska arko ee PPS-HD, waxa noqon doontaa maalinta Isniinta ilaa Khamiista, iyada oo hawlihii intii badnaa ay xiran yihiin maalinta Jimcaha ilaa inta laga gaarayo bisha Luulyo 31keeda, 2020. Tani waxaa loo tixgalinayaa maalin fasax ah qeyb ahaan, waxa ay sababi doontaa in la yareeyo saacadihii shaqada, waxa aan rajeyneynaa in shaqaalahayagu ay ka qeybqaadan doonaan barnaamijka la magac baxay Shaqada La Wadaagey ee Oregon (Work Share Oregon ).

Waxa aan aaminsanahay, u guurista afarta maalmood ee shaqada ah todobaadkii inay nagu hoggaamineyso qiimaha bulshadayada aan u hayno in ardaydu yihiin udub-dhexaadka sidii aan u sii wadi lahayn ballankayagii ahaa ee Sinaanta Jinsiyadaha iyo Cadaalada Bulshada (PPS reImagined). Marka aynu afar maalmood oo shaqo u guurno todobaadka saddex bilood ee soo socda—**qorshahani waxa kaliya ee uu yareynayaa isugeynta jadwalka waxbarashada guriga lagu qaadanayo labo maalmood taasi oo dheelitiri doonta in miisaaniyadii si weyn loo jaro sanadka soo socda**—Waxa aan aaminsanahay in aynu heli doono sidii loo xakameyn lahaa sidii ayna raad ugu yeelan waqtiga fog waxbarashada ardaydeena, waxaad fahamtaan in ay jirto fursado sinaan la'aan oo ballaaranaysa maalin kasta oo aynaan joogin iskuuladii, gaar ahaan ardayda aan cadaanka ahayn. Meelmarinta qorshahani, waxa sidoo kale oo aan ogsoonahay in shaqaalaha intooda badani inay xaq u leeyihiin inay ka qeybgalaan gargaarka dhaqaale ee dawlada dhexe siineyso shaqaalaha ee la yiraa CARES Act dollars (todobadkii waa $600 doolar oo go'an), iyada oo lagu biirinayo magdhowga lacageed ee gobolku bixiyo marka ay shaqaaluhu waayaan shaqadii ay qaban jireen ama saacadihii shaqadoodii wax laga jaro. Tani macnaheedu waxa weeye shaqaalaha- gaar ahaan kuwa safka hore- waxa ay heli doonaa lacagta dhaqaalaha lagu ilaaliyo ee dheeraadka ah sidii loogu taageeri lahaa waqtigani aynu jirno dhibaatada, dhammaan sababta aynu waxaas oo agab ah isku wada keeneynaa waa sidii loogu biirini lahaa dhaqaalaheena maxaliga ah iyada oo la ilaalinayo dhaqaalaheena qaaliga ah ee iskuuladeena.

**Maxay tani uga dhigan tahay waxbarashada ardaygaaga?**
Mudnaantayada koowaad waa sidii aan u xaqiijin lahayn in ardaydeenu helaan addeegyadii lagama maarmaanka u ahaa iyada oo loo gaarsiinayo si caadiya iyada oo guryaha waxbarashadii lagu siinayo. Marka laga soo gudbo xaaladan kala guurka ah ee afarta maalmood todobaadkii, mudnaantayada waxa ay ahaan doontaa mid aan isbedelin marnaba oo isku mid ah:

> *PPS-HD (Waxbarashada Guriga)*: Macalliniintu waxa ay sii wadi doonaan baristii, la xiriirkii iyo inay si kooban ula xiriiraan ardayda, maalinta Isniinta ilaa Khamiista, inta ka harsan sanad-dugsiyeedka. Xaqiiqdii, ma rajeyneyno guud ahaan inay hoos u dhacayso heerkii ay macalinka iyo ardaydu ay ku xiriirayeen inay ku timaado hoos u dhac todobadkii. Laakiin, shaqadii todobaadkii ee la yareeyey waxa loo maareyn doonaa in la yareeyo shirarkii shaqaalaha iyo hawlihii kale ee aan ardayda la xiriirin. Xitaa marka la yareeyey todobaadkii, waxa aan mudnaanta siin doonaa ardayda fasalka 12naad ee qalin-jabineysa ilaa maalinta qalin-jabinta.
>
> *Cuntada Ardayda*: Iyada oo 15 goobeed ee cuntadu aan laga bixineyn cunto maalinta Jimcaha, kooxda addeegyada cuntadu waxa ay sii wadi doonaan qaabka ay iminka u shaqeeyaan inay cunto dheeraad siiyaan ilmihii bulshadeena ka mid ah saddexda maalmood ee aan cuntada la bixineyn inay maalinta Khamiista cuntada qaataan.

Ka sokow dareenka adag ee saadaalinta miisaaniyada mustaqbalka soo socda, waxaa iga go'an inaan u xaqiijiyo in PPS ay sii wadayaan higsigayagii ahaa in si buuxda loo taageero arday kasta, gaar ahaan ardaydeena aan cadaanka ahayn, sidii ay u gaari lahaayeen guushooda ay gaari karayaan. **Waxa aan aaminsanahay tallaabooyinka aan maanta idinla wadaagayaan iyo tallaaboyinka kale ee kharashka lagu dhimayo ee aan hadda dhaqangalinay, sidaas darteed dhib kasta ha noqotee waxa ay ilaalin doontaa sidii ay nooga caawin lahayd in la ilaaliyo**

**maalmihii iskuulka ay ardaydu dhiganeysay, addeegyada taageera ardayda, iyo shaqaalaha aan haysano ee dugsiyadeena dadweynaha Portland sanadka soo socda**. Waxa aan ogahay inaan ka bixin doono dhibaatadani, inaga oo ka adag kana adkeysi badan intii hore, iyada oo aan ardaydeena u diyaarineyno sidii ay u hoggaamin lahaayeen isbedelka iyo horumarinta dunida.

Waad mahadsan tihiin. Waxa aan idiin rajeynayaa in aad igala qeybqaadan doontaan sidii aan isku dhiirigalin lahayn inay rajadu fiican tahay, geesinimo iyo isbedelka garashada ardaydeena, qoysaskeena, iyo shaqaalaheena waqtigani dhibaatada aan hore inoo soo marin.

Caafimaad baan idiin rajeynayaa.



Guadalupe Guerrero
Superintendent